



Warbixinta guud ee tallaalka Covid-19 iyo tallaalka mRNA (Pfizer/BioNTech, Moderna)

Tallaalka waxtar iyo badqab ma yahay?

Tallaal walba ee Switzerland wuxuu u baahanyahay ansixinta lagu isticmaalayo iyo tallada. Ujeedadaan darteed, waa inay buuxisaa sharuudaha sareeyo ee badqabka, waxtarka iyo tayada. Wakaalada Swiss ee Badeecooyinka Daaweynta Swissmedic waa la wada baaray oo loo ansixiyay mRNA tallaalada la dagaalamo Covid-19. Waa badqab iyo waxtar. Dhoor tobaneeyo kun oo dad ah ayaa ku qaatay tallaalka tijaabooyinka. Sidoo kale badqab iyo waxtar ayay u tahay dadka da'da waayeelka iyo dadka qabo cudurada raaga. Tan iyo ansixintooda, dhoor balaayin dad ah ayaa lagu tallaalay tallaaladaan. Taqasusyada ayaa sii wado inay kormeeraan badqabka iyo waxtarka tallaalada. Faa'idooyinka tallaalka waa inuu si cad u cabiraa halisaha. Kaliya markaas kadib ayaa tallaalkaan loogu talliyay Switzerland Guud ahaan kuwa xiggo ayaa muhiim ah: Halista saameynada caafimaadka tallaalka kadib aad ayuu uga yaryahay halista inaad si daran ula xanuunsatid caabuqa kadib ee fayraska korona.

Halkee ayaan qaadan karaa tallaalka?

Dowlada faderaalka waxay hormarisay xeelada tallaalka iyo tallooyinka tallaalka. Ka fiiri websaydka ama leenka warbixinta degmadaada (www.bag-coronavirus.ch/kantone) si aad u ogaatid meesha aad ka heli kartid tallaalka. Ama weydiid dhaqtarkaaga, farmashiistaahaaga ama farmashigaaga.

Cida tallaalka loogu talliyay?

Waxaan ugu talineynaa tallaalka Covid 19 oo tallaalka mRNA dadka oo dhan oo da'da 12 sanno jirka iyo ka weyn.

Talladaan waxay si gaar ah u quseysaa

- Dadka sida gaarka ah halis ugu jiro fayraska koronaha (dadka qabo cudurka daran, dadka 65 sanno jirka iyo ka weyn, iyo dumarka uurka ah);
- xiriiradooda dhow ee jawiga gaarka iyo xirfadlaha.

Waxaan ku talineynaa ku tallaalida Covid 19 iyo tallaalka carruurta Pfizer/BioNTech ayaa sidoo kale loogu tallogalay carruurta da'dooda ah 5 illaa 11 sanno (fiiri warqada "tallaalka Covid 19 ee loogu tallogalay carruurta da'dooda ah 5 illaa 11 sanno").

Yaa ah inuusan qaadan tallaalka?

Kulama talineyno tallaalka Covid 19 ee tallaalka mRNA inay qaataan shaqsiyaad xiggo:

- Shaqsiyaadka qabo alaarjiga daran ee laga xaqiijiyay qeyb walba ee tallaalada, gaar ahaan polyethylene glycol (PEG) ama tromethamine (TRIS). Fadlan kala tasho dhaqtarka alaarjiga wixii tallo ah.
- Carruurta iyo qaangaarka ka hooseeyo 5 sanno jirka. Illaa iyo hadda, ma jiraan xog ku fillan tallaalka heerkaan.

Fadlan ogow: Ma qabtaa qandho sareyso? Miyaad jirantahay iyo ma dareemeyso xanuun? Haddii ay sidaas tahay, dib u dhig balantaada tallaalka. Miyaad sugeysaa natiijada

baaritaankaaga Covid 19? Ama miyaad ku jirtaa isgooniyeeyn ama karantiil? Markaas kadib ha qaadan tallaalka hadeer. Qaado tallaalka sida ugu dhaqsaha badan ee suurtoogalka ah.

Waxa quseeyo haddii aan uur ahay ama aan rabo inaan uur noqdo?

Miyaad qorsheyneysaa inaad uur qaadiid? Markaas isu tallaal sida ugu dhaqsaha badan ee suurtoogalka ah. Ma horaan ayaad uur u laheyd oo aadan qaadan tallaalka ka hor inta aadan uur qaadin? Kadib waxaan ku talineynaa tallaalka laga bilaabo 12 isbuuc uurka ah (oo macnaheedu yahay laga bilaabo bisha saddexaad ee uurka). Si kastaba, waxaa sidoo kale suurtoogal ah horaantii uurka.

Haddii aad uur tahay ama aad qorsheyneysid inaad uur qaadiid oo aad qabtid su'aalo ku saabsan tallaalka, la hadal bixiyaha daryeelkaaga caafimaadka ama umulisada.

Sidee ayaa tallaalka loo sameeyay?

Waxaad ka qaadanaysaa saliinka garabka kore. Tallaalka koowaad kadib, waxaad joogeysaa goobta 15 daqiiqo kormeer ah.

Intee jeer ayaan u baahannahay inaan ku qaato tallaalka?

Waxay caadi ahaan qaadataa labo tallaalo. Waxaad qaadan kartaa tallaalka labaad afar isbuuc mida koowaad kadib.

Qaado labada tallaalo. Kaliya markaas kadib ayaad si wanaagsan u illaalsanaaneysaa sida suurtoogalka ah. Haddii aad horaan u qabtay caabuqa fayraska korona ee la xaqiijiyay (baaritaanka PCR, baaritaanka degdega antijeenka, baaritaanka difaaca jirka), waxaad caadi ahaan kaliya u baahantahay hal tallaalka oo tallaalka mRNA.

Ka dhaafidaha ayaa quseeyo dadka sida gaarka ah u nugul oo leh difaaca jirka liito; la hubi dhaqtarkaaga.

Dadka da'dooda ah 16 sanno jirka iyo ka weyn, tallaalka xoojiyaha waa lagu talliyay laga bilaabo 4 bilood kadib aasaaska tallaalka dhameystiran kadib. (fiiri warqada ugu yar «Tallaalka xoojiyaha tallaalka mRNA»).

Sidee ayuu tallaalka ii illaaliyaa?

Jirkaaga ayaa dhiso illaalo looga soo horjeedo Covid-19. Tani waxay raagtaa illaa qiyaastii hal ama labo isbuucyo tallaalka labaad kadib. Halista ah inuu kugu dhaco covid-19 ayaa si weyn u yaraata.

Kani waa muhiim in la ogaado: Ma jiraan wax sida illaalo dhameystiran. Dadka qaar ayaa ku dhici karo Covid-19. Si kastaba, tallaalka, waxaa jiro fursad sareyso oo aysan si daran u jiraneynin.

Halkaan waxaad ka heli kartaa warbixin badan oo sharaxan ee ku saabsan sida tallaalka u shaqeeyo www.bag-coronavirus.ch/mrna

**Illaa intee ayuu tallaalka ii illaaliyaa?**

Tallaalada mRNA si wanaagsan ayay uga illaalisaa cudurka covid-19 ee daran ee isbitaal dhigida. Si kastaba, dadka 65 sanno jirka ah iyo ka weyn, waxay muujisay in illaaladaan tallaalka laga yaabo inuu baaba'o waqti kadib.

Shaqsiyaadkaan, waxaan kula talineynaa tallaalka xoojiyaha ee bilaabanayo 4 bilood tallaalka ugu dambeeyay kadib. Ma cado in illaalada tallaalka ka hortaga cudurada daran hoos uga dhacdo dadka ka hooseeyo 65 sanno jirka iyo noocyada fayraska cusub. Illaalada ka hortaga cudurka qafiifka ah iyo ka hortaga faafida fayraska, dhinaca kale, wuu ka yaraadaa waqti kadib dadka. Tan waxay u dhici kartaa si degdeg oo tartiib ah waxay ku xirantahay nooca. . Sidaas darteed, waxaan sidoo kale ku talineynaa tallaalka xoojiyaha oo loogu talloagalay dhammaan dadka ka bilaabanayo 16 illaa 64 sanno jirka.

Miyaan qaadi karaa Covid-19 sababtoo ah tallaalka?

Maya. kugu ma ridayo covid-19 tallaalka.

Ma jiraan fayraska korona ee ku jiro tallaalka.

Miyaan heli karaa tallaalka haddii aan horaan u qaaday fayraska korona?

Is tallaalka ayaa sidoo kale ah muhiimad aad u wanaagsan haddii aad horaan u qabtay caabuqa fayraska korona. Caabuqa kadib, si aasaas ahaan ayaad uga illaalsantahay caabuqa cusub illaa iyo muddo. Inta ay tahay lama yaqaano.. Waxaan sidaas darteed ku talineynaa tallaalka si markaas aad si wanaagsan uga illaalsantahay iyo waqti muddo dheer. Laga bilaabo afar isbuuc kadib caabuqa fayraska korona la xaqiijiyay, hal garoojo tallaalka ah ayaa caadi ahaan ku fillan aasaaska tallaalka. Garoojada labaad ee tallaalka waa la dhaafi karaa.

Miyay jiraan wax saameynada caafimaadka ah?

Qof ahaan ka hooseeyo 30 sanno jir, sida barar ayaa marar badan lagu arkay tallaalka kadib iyo tallaalka Moderna. Sidaas darteed, tallaalka leh tallaalka Pfizer/BioNTech ayaa si ku haboon loogu talliyay dadka ka hooseeyo 30 sanno da'da ah. Labada tallaalka, faa'idada tallaalka Covid-19 ayaa si cad u cabirto halisaha dhibaatooyin walba, xittaa shaqsiyaadkaaga yaryar.

Si kastaba, bararka murqaha wadnaha ama daboolka wadnaha aad ayuu can uga yahay caabuqa fayraska korona badalkii tallaalka.

Marka laga reebo midaas, ma jiraan wax aan caadi aheyn ee la xiriiro saameynada caafimaadka daran illaa iyo hadda.

Waa maxay saameynada caafimaadka suurtoogalka ah?

- Aaga garabkaaga meesha lagaa tallaalka ayaa gaduudato, xanuun ah, ama bararta.
- Madax xanuun
- Daalka
- Xanuunka muruqa iyo xubinta
- Aastaamaha guud sida qarqaryada, dareemida qandho ama lahaanshaha qandho yar

Saameynadaan caafimaadka inta badan waxay dhacaan tallaalka kadib. Waxay muujiyaan in jirka uu dhisayo illaalo

lagula dagaalamo cudurka. Marka, qaab dhexaadka, sidoo kale waa aastaamo wanaagsan.

Xaalada falcelinta alaarjiga, waxaa jiro, tusaale ahaan, barar daran, gaduudasho, cuncunm ama yaraanshaha neefsashada islamarkiiba tallaalka kadib. Caadi ahaan aastaamaha muruqa wadnaha waa xabad xanuun, neefsashada oo yaraata iyo wadno joogsiga. La xiriiro dhaqtarkaaga islamarkaasba haddii aad la kulantid aastaamo noocaas ah.

Illaa intee ayay saameynada caafimaadka raagi karaan?

Saameynada caafimaadka ayaa caadi ahaan dhammaado dhoor maalmood kadib. Weli ma qabtaa saameynada cdaafimaadka isbuuc kadib? Miyay ka sii darayaan? Ama miyaad walaacsantahay? Markaas la hadal dhaqtarkaaga ama xirfadlaha daryeelka caafimaad.

Waa la i tallaalay. Miyaan qaadi karaa dadka kale fayraska korona?

Kadib dhameystirka tallaalka, suurtooganimada inaad qaadeysid fauraska korona ayaa si weyn u yaraada, iyo sidaas waa halista gudbinta. dhameystiran kadib. Si kastaba, tallaalka ma bixiyo illaalada boqolkiiba 100% iyo illaalada way yaraataa waqti kadib. Saameynta illaalada iyo xawaaraha ay ku yareeyo ayaa kala duwanaa karto waxay ku xirantahay nooca fayraska.

Fadlan ogow: Sii wad inaad raacdid sharciyada nadaafada iyo dhaqanka iyo sharuuda maaskaraha meesha ay quseeyso.

Yaa bixiyo lacagta tallaalka?

Tallaalka bilaash ayuu kugu yahay. Shirkada caymiska caafimaadka ayaa bixiso qeyb ka mid ah tallaalka. Dowlada faderaalka iyo gobolada ayaa bixiyo inta kale.

Tallaalka ma iqtiaarbaa?

Haa. Tallaalka gudaha Switzerland waa iqtiaar.

Halkee ayaan ka heli kraa warbixin badan?

Wixii warbixin dheeraad ah ee tallaalka Covid 19 waxaad booqan kartaa websaydka BAG:

www.bag-coronavirus.ch/impfung

Ama weydii dhaqtarkaaga. Ama farmashiyahaaga.

